# SPEAK@HOME

HAWLAHA DHAGAYSIGA IYO HADAKLA | #6

Lexia ENGLISH LANGUAGE DEVELOPMENT


Kula hadalka ilmahaaga luuqada guriga iyo la wadaagista dhaqankaaga iyo khibradahaaga iyagu waxay xoojinaysaa barashadiisa Ingiriisa. Isticmaal geemam madadaalo iyo hawlo luuqad kasta ah si aad u taageerto hormarka luuqadeed oo guud.


## Madadaalada Codadka

Kalmaduhu waxay ka kooban yihiin codad. Ka fikir codadka kala duwan ee qayb ka ah kalmada aad garanayso.

1. Lasoo bax hal shay oo kugu xeeran.
2. U dheh shayga ilmahaaga.
3. U jajabi kalmada codad.
4. Ka dalbo ilmahaaga inuu kuu sheego codka uu marka kowaad iyo ugu danbayn maqlay waxa uu u eeg tahay.

**Tusaale ahaan:** *Kani waa koob. Codadku waa: /k/ /oo/ /b/. Codadka kowaad waa /k/. Codadka ugu danbeeyaa waa /b/.*






## Shaybaadhka Dhagaysiga

Cod u akhri ama sheeko uga sheekee. Ma u baahan tahay fikir sheego? Kala soo bax mid kuwan:

| | |
|---|---|
| la yaab | sheeko qoys |
| sheeko leh wax laga baranayo | sheeko yaraantii ah |
| sheeko madadaalo | sheeko wargeys |

Kadibna waydii su'aalo:

- Imisa ______ weeye?
- Waa maxay midabka ______?
- Waa maxay cabirka ______?
- Waa maxay qaabka ______?
- Sheekadu badanaa maxay ku saabsan tahay?
- Maxaad ku aragtaa madaxaaga?

Ku dhiiri geli ilmahaaga inuu ku jawaabo jumlado dhamaystiran.

**Tusaale ahaan:**


*Waa maxay midabka kubadu? Waa casaan.*

## Matal

1. Ka dooro hawl liiska.
2. Mid kamid ah ciyaartoydu ha matalo.
3. Ciyaartoyda kale waa in kolba uu mid ku nasiibiyaa hawsha isaga oo isticmaalaya weedhaha.

**Tusaale ahaan:**

*Miyaad jaasaysaa? Waad jaasaysaa!*




Lexia © 2024 Lexia, a Cambium Learning Group company.

# SPEAK@HOME

HAWLAHA DHAGAYSIGA IYO HADAKLA | #6

## Soco

La bixitaanka ilmahaaga. Ka hadal waxyaabaha aad aragto. Isticmaal su'aalaha soo socda si ay kuugu hagaan wada sheegeysiga.

- **Waa maxay kuwani?**
- **Waa maxay cabirkeedu?**
- **Waa maxay qaabkeedu?**
- **Waa maxay midabkeedu?**
- **Waa imisa?**
- **Maxaad aragtaa?**

## Istuudyaha Farshacan

1. Hel warqad iyo agabka sawirida.
2. Kolba midkiin ka sawiro wax **casaan ah**.
3. Kadibna iska waraysta sawirada. Isticmaal su'aalaha soo socda si ay kuugu hagaan wada sheegeysiga.

| | |
|---|---|
| **Waa maxay kani?** | **Waa maxay kuwani?** |
| **Waa maxay cabirkeedu?** | **Waa maxay cabirkoodu?** |
| **Waa maxay qaabku?** | **Qaabkee bay yihiin?** |

Ku dhiiri geli ilmahaaga inuu ku jawaabo jumlado dhamaystiran.

**Tusaalayaal:**

*Kani waa tufaax.*
*Wuu yar yahay.*
*Waa goobaab.*




Marka xigta, dooro midab kale.

## Qolka Sawirka

Is barbar dhig labo sawir: xayawaanka aad jeceshahay iyo xayawaanka ilmahaagu u jecel yahay. Kala hadal waxa isku midka ah iyo waxa ka duwan.

Waxa aad sidoo kale is barbar dhigtaa...




## Waxaan Arkaa

Dooro ciyaartoy si aad u bilawdaan. Kadibna aayar u doorta shay cid walba arki karto oo kadibna ka bixiya ishaaro sharaxiisa. Ciyaartoyga kale waa inuu ku nasiibiyo shaygu waxa uu yahay.

Shayada la sharaxayo:

**midab** **qaab** **booska** **goobta** **cabir**

**Tusaalayaal:**

*Waxaan arkaa shay saaran miiska.*
*Waxaan arkaa shay liimi ah.*
*Waxaan arkaa shay yar.*
*Waxaan arkaa shay goobaab ah.*



Lexia ENGLISH LANGUAGE DEVELOPMENT

© 2024 Lexia, a Cambium Learning Group company.